

Macluumaad ku aaddan distans wax ku barashada oo ku socda ardayda dugsiga sare iyo waaliddiinta

2020-12-04

Waad salaamantahay!

Tani waa warbixin kugu socda adigaaga dhigta mid ka mid ah dugsiyada sar-sare ee degmada Norrköping iyo adigaaga waalidka ah. Dhammaan dugsiyada sar-sare ee ay degmadu leedahay waxay u wareegayaan distans wax ku dhigid waqti buuxa ah laga billaabo 7 duseembar ilaa iyo 6 jannaayo 2021. Waxaa taa la sameynayaa iyadoo laga duulayo talooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada iyo xukuumadda ee soo baxay 3 duseembar. Tallaabtu waa isku day lagu joojinayo cudurka bulshada ku dhex faafaya ee iminka bulshada ka dhex socda.

Isbeddelku wuxuu khuseeyaa barnaamijyada oo dhan. Waxaa jira dhawr waxyaabood oo keeni kara in waxbarashada lagu qaato ama lagu qaadan karo iskoolka.

- Barnaamijka hordhaca iyo luqad barashadu waxaa lagu dhigayaa goobta, micnaha iskoolka gudihiisa.
- Dugsiga sare ee dadka caqliga naafada ka ah waxaa wax lagu dhiganayaa iskoolka.
- Ardayda u baahan taageero gaar ah, ardayda deggan guri ciriiri ah iyo ardayda qabta welwelka bulshada la xiriira oo baahi weyn u qaba in ay iskoolka joogaan waxay fursad u haystaan in ay iskoolka wax ku dhex dhigtaan.
- Qeybaha farsamada ee tusaale ahaan waxbarashada xirfadaha waxaa lagu dhigi karaa goobta.
- Imtixaannada iyo qiimeynta waxaa lagu sameyn karaa goobta.
- APL-ku sidi caadiga ahaa ayuu intii suurta gal ah u soconayaa.

Halkan ayaad gadaal dambe uga arki kartaa kulamada warbaahinta ee xukuumadda: <https://youtu.be/mmAsluGRLx4>

Waan fahmeynaa in ay tani adagtahay, ayna adiga kaaga dhigantahay isbeddel weyn. Waan qaddarineynaa sabarkaaga, dadaalkaaga waxbarashada, in aad gacan ka geysaneysid in distans wax ku dhigashadu ay si fiican u dhacdo. Waa muhiim in aad sii waddid raacitaanka talooyinka iyo tilmaamooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada, xitaa waqtigaaga firaaqada. Waad ku mahadsantahay dulqaadka iyo adkeysashada!

Muhiim ayey noo tahay in aad fursad u heshid in aad dhameysatid waxbarashadaada, waxaanna mar walba ka shaqeyneynaa in aan abuurno duruufo

wanwanaagsan oo kuu saamaxaya in aad guuleysatid. Shaqadan waxaan ugu baahannahay caawimaaddaada, waxaadna u baahantahay in aad qaaddid mas'uuliyad tii hore ka weyn oo xagga waxbarashadaada ah. Sidaas darteed waxaan rabnaa in aan carrabka ku adkeyno muhiimadda ay leedahay in aad waxbarashada diiradda saartid.

- Gurigaaga boos aad wax ku baratid ka sameyso
- Raac ruutiinnadaada maalinlaha ah ee caadiga ah
- Raac jadwalkaaga caadiga ah
- Macalinka wax kuu dhiga la lahaw xiriir maalinle ah

Waxaa wax loo dhigayaa isla sidi hore ee caadiga ahayd, halkaas oo xitaa lagaa sii rabo in aad si firfircoon wax uga sii qeyb qaadatid. Waan fahmeynaa in ilaa heer wax lagaaga baahantahay, waxaanna rejeyneynaa in aan iskaashan karno. Waxaa annaga muhiim noo ah in aad fursad u heshid in aad guuleysatid iyo in aad waxbarashadaada u dhameystiratid sidi loo qorsheeyay. Haddii aad caawimaad u baahantahay la xiriir macalinka aad hoos timaadid.

Shaqaaluhu waxay joogaan dhismooyinka iskoolka haddii aad u baahantahay in aad iskoolka ka soo qaadatid waxyaabaha iskoolka ama caawimaad ama taageero ugu baahantahay waxbarashada. La xiriir macalinka aad hoos timaadid, waqtina booqashadaada u qabso si aysan ugu dhicin waqti wax la dhiganayo.

Maxay tahay in aad ka fikirtid haddii distans wax lagu dhiganayo

Distans wax ku dhigid waxay ka dhigantahay maalamo iskool oo buuxa, waxaadna ilaa intii suurta gal ah raaceysaa jadwalkaaga caadiga ah. Macallinkaaga ayaa diiwaan gelin doona xaadiritaanka casharka. Ha illoobin in lagu qorayo maqnaasho aan la oggoleyn haddii aadan is xaadirin. Haddii aad xanuunsantahay sidi caadiga ahayd ayaad jirro isugu qoreysaa. Wixii macluumaad ah oo dheeraad ah ka eeg bogga iskoolkaaga.

Casharradaadu waxay hor iyo horraan ka koobnaanayaan casharro uu macallin dhigayo iyo shaqo uu qofku keligiis qabanyo. Macallinkaaga ayaa kuu sheegaya sida ay casharradu u baxayaan. Waa muhiim in aad si joogto ah uga warheysid e-mailkaaga.

Adiga ayaa ka arday ahaan qaadanaya mas'uuliyadda ah in aad ka shaqeysid koorsooyinkaaga iyo in aad raacdid jadwalkaaga ilaa intii suurta gal ah. Mar walba waxaad fursad u haysataa in aad la xiriirtid macallinkaaga haddii aad u baahantahay caawimaad ama in aad macluumaad dheeraad ah heshid. Adiga ayaan halkan kuu joognaa.

Distans wax ku dhigid, sidee baa digital loogu shaqeyn karaa?

Raac jadwalkaaga, waqti fiican casharka ka horna Googlekonto-da iskoolku ku siiyay ku gal kumbuyuutarkaaga.

Waxaa inta badan wax lagu dhigayaa *Google Classroom* iyo *Google Meet* (iyadoo la adeegsanayo isku xiraha video-ga), oo aad ka heli kartid meesha aad caadi u gashid.

Haddii sababa jira awgood aysan kuu suurta gal ahayn in aad gurigaaga wax ka soo dhigatid waxaa jirta fursad aad iskoolka wax kula dhigan kartid. Haddii ay sidaan tahay la hadal macallinka aad hoos timaadid.

Haddii uu kumbuyuutarkaagu jabyo ama uusan shaqeyneyn waxaad la xiriireysaa shaqaalaha IT-ga mas'uulka ka ah. Haddii aadan ogeyn cidda IT-ga mas'uulka ka ah waxaad la xiriireysaa macallinka toos kuu qaabilsan. Haddii aad heli kartid qalab kale oo digital ah waxaad kaas ka geli kartaa Google-ka si aad waxbarashada uga qeyb qaadatid.

Macluumaad iyo su'aalo iyo jawaabo la xiriira distans wax ku dhigashadu waxay ku jiraan bogga intarneetka ee degmada Norrköping:

www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/distansundervisning-for-dig-som-gar-i-kommunal-gymnasieskola

Qadada Iskoolka

Adigaaga, inta distans wax lagu dhigayo, baahida u qaba qadada iskoolku waxaad fursad u heysataa in aad soo qaadatid weelka cuntada lagu qaato ee qadada.

Waxaad u baahantahay in aad sheegtid baahida aad qado u qabtid, waxaadna u baahantahay in aad toddobaad walba wargelinta cusbooneysiisid. Haddii aadan maalmaha usbuuca oo dhan qado u baahneyn waxaad u baahantahay in aad baahidaada sheegtid laba jeer.

Soo sheegidda iyo macluumaad dheeraad ah oo tusaale ahaan ku aaddan halka aad weelka cuntada lagu qaato ee qadada ka soo qaadan kartid waxay ku jiraan www.norrkoping.se/skollunch. Waxaa sidoo kale halkan ku jira waqtiyada foomka lagu soo sheegayo baahida qadadu goorta ay faranyihiin.

Maalinta ugu horreysa ee la soo qaadanayo waa 9 disembar. Waxaad markaas soo qaadan kartaa seddax maalin cuntadood. Baahidaada soo sheeg inta u dhexeysa jimcada 4 disembar iyo isniinta 7 disembar.

Haddii aad u baahantahid cid aad la hadashid

Shaqaalaha iskoolka ee caafimaadka ardaydu waxay joogaan goobta, sidi caadiga ahayd ayaana loo heli karaa. Haddii aad adigu welwelsantahid ka arday ahaan, aad caafimaad darro dareemaysid ama aadan waxbarashada la haysan waad nala soo xiriiri kartaa. Caafimaadka ardayda waxaa lagu heli karaa khadka e-mailka, talefoon ama Skype. Haddii aad rabtid in aad weji ka weji qof ula kulantid oo aad la hadashid cid naga mid ah waa ay suurta geleysaa, nala soo xiriir si aad waqti kuugu qabanno.

Salaan saaxibtinimo

Xafiiska waxbarashada